

Xaruunta taageerada ee la dagaalanka xoogitaanka ay cidi u geysato qof u dhow oo ku kalsoonaa - ee Oslo (Støttesenter mot Incest) -waa urur gaar loo leeyahay oo iskaa wax u qabso ah, maamulkiisana inta badan hayaan dumar la xoogay iyo hooyooyin carruurtoodii lagu sameeyey xoogitaan, ayna ku sameeyeen, cid u dhow oo ay ku kalsoonaayen.

WAXA AAN U HAYNAA BARNAMIJYO KALA DUWAN:

- Hablaha da´ doodu ka wayntahay 12 ee ay xoogeen cid u dhow oo ay ku kalsoonaayeen.
- Dumarka waaweyn ee ay xoogeen cid u dhow oo ay ku kalsoonaayeen
- Waalidka carruurta ay xoogeen cid u dhow oo ay ku kalsoonaayeen.
- Cidda ku jirta nolol wadaaga (partnere)
- Xigaalka ama ehelka
- Khubarada
- Ardayda-jaamacadda

WAA MAXAY XOOGITAANKA CID KUU DHOWI (INCEST)?

Xoogitan cid kuu dhow (Incest) waxa lagu sharixi kara "Ilmihii oo ay xoogtay cid uu ku kalsoonyahay oo u dhoweyd ". Qofkaa ilmaha xoogay wuxu noqon karaa aabo, hooyo, walaalo, qof kale oo qoyska ka mid ah, deriska, macalinka ama cid kaleba.

Xoogitaanka ilmaha la xoogaa waxa ay noqon kartaa ilmaha oo meelihiisa taranka u gaarka ah la taataabto, biyo iskaga keenid, af candho u gelin iyo u galmoodba. Waad nala soo xiriiri kartaa, adiga oo aan u baahnayn in aad magacaaga sheegtid . Cid kasta oo ka shaqaysa xaruuntaan (SMI) Oslo waxa saaran waajibka xogqarinta.

Siyaasad iyo diin ahaanba waxa aanu nahay dad dhexdhexaad ah.

KHUBARO:

Hay` adaha caawimada miyaad shaqaale ka tahay, oo aad ka shaqaysaa arrimaha xoogitaan ay cidi cid u dhow ku sameyso(incest)? Ma kula kulantaa cid xoogitaan loo geystay (incest) dugsiyada, maxakamada ama si kaleba? Ma u aragtaa arrimaha xoogitaanka (incest) in ay yihiin arrimo sidooda u adag oo culays badan? **Nala soo xidhiidh!**